DANISH HEALTH AUTHORITY

# Macluumaadka ku saabsan barnaamijka Deenishka ee baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka

Health for all

# Baadhitaanka Kansarka ee Dhuunta ilmagaleenka

Haddii ay da'daadu tahay inta u dhaxaysa 23 iyo 64, waxaa lagaa baadhi karaa kansarka dhuunta ilmagaleenka. Baadhitaanku wuxuu ka heli karaa HPV (Fayraska burooyinka) ama unugyada aan caadiga hayan gudaha dhuuntaada ilmagaleenka, kaas oo, haddii la daayo iyaddoon la daawayn, wuxuu keeni karaa kansarka dhuunta ilmagaleenka.

Gudaha warsidahan, waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo ku saabsan nidaamka baadhitaanka. Warsidahan wuxuu kugu caawin karaa inaad go'aan ka gaadho inaad qaadato baadhitaanka dhuunta ilmagaleenka ama aad iska dhaafto. Waxaa jira macluumaad dheerada oo ku xusan ah websaydka Masuuliyiinta Caafimaadka Dheeniska, halkaasoo, tusaale ahaan, aad ka heli karto su'aalaha inta badan la is waydiiyo ee ku saabsan baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka.

Masuuliyiinta Caafimaadka Danishka waxay ku talinayaan baadhitaanka kansarka ilmagaleenka. Lakiin waa muhiim ah, inaad adiga naftaada go'aan garto.

**Haddii aad uur leedahay ama ay daawayn kuu socoto ama baaritaan cudurada haweenka aad ku jirto, waxaad u baahan tahay in aad la tashato dhakhtarkaaga, goorta kugu habboon ee aad samayn karto baaritaanka dhuunta ilmagaleenka.**

Haddi AANAD rabin inaad aqbasho bixinta baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka, waxaad iska diiwana gelin kartaa websaydkan: **www.sundhed.dk**.

Haddii aad beddesho aragtidaada, had iyo jeer is diiwaan geli mar labbaad addoo la xidhiidhaya gobolka aad ku nooshahay. Warqadda marti qaadka laguugu soo diray e-Boks, waxaad ka arki kartaa cidda lala xidhiidhayo.

Haddii aad doroato inaanad ka qayb gelin barnaamijka baadhitaanka dhuunta ilmagaleenka, tani ma saamayn doonto fursadahaaga ah in lagu baadho oo lagaa daweeyo kansarka dhuunta ilmagaleenka iyo cudurada kale.

# Waa maxaay baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka?

Baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka waa baadhitaanka haweenka aan layahn astaamaha kansarka dhuunta ilmagaleenka. Baadhitaankan lama mid ahan sida baadhitaanka buuxaee kansarka dhuunta ilmagaleenka.

Xataa haddii lagu baadho, weli waxaad qabi kartaa ama kugu dhici kara kansarka dhuunta ilmagaleenka.
Waxaa muhiim ah, inaad la xiriirto dhakhtarkaaga haddii ad isku aragtid astaamaha qaska, tusaale ahaan dhiig bax aan la filayn ama xanuunka qaska. Waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo ku saabsan kansarka dhuunta ilmagaleenka bogga ugu dambeeya ee warsidahan.

**Kansarka dhuunta ilmagaleenka waxaa lagaga hortagi karaa** sahaminta unugyada aan caadiga ahayn ka hor inta aanay noqon kansarka. Baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka iyo daawaynta sidaas awgeed waa qaab waxtar leh oo looga hortaggo kansarka dhuunta ilmagaleenka.

# Sida baadhitaanka loo sameeyo

Baadhitaanka waxaa loo qaada sidii baadhitaana cudurada haweenka, waxaane qaado dhakhtarkaaga. Baaris unugyo ayaa laga qaadi doonaa dhuuntaada ilmagaleenka iyaddoo la adeegsanayo burush yar. Si loo helo baaris la isticmaali karo, waa inaanad lahayn dhiigaaga caadada ama aanad uur lahayn wakhtigabaaritanka.

Haweenka badidood waxaa lagu wargeliyaa, in baaristoodu ay caadi tahay. Sidoo kale waxaa dhici karta in baaris farsamo ahaan aanay ku filnayn oo baaris cusub loo baahan yahay.

---

# Waa maxay sababta kansarka dhuunta ilmagaleenka?

Kansarka dhuunta ilmagaleenka had iyo jeer waxaa sababa caabuqa/infekshanka loogu yeedho HPV. Inta badan, caabuqa/infekshanka HPV iskiis ayuu u baba'aa. Mararka qaarkood, waxaa dhacda, in cabuuqa/infekshanka HPV uu noqdo mid raaga iyo ayadoo si kedis ah, ay ku dhashaan unugyo aan caadi ahayn gudaha xuubka dheecanka leh ee dhuunta ilmagaleenka. Unugyada aan caadiga ayhayn, baadankood iskooda ayey u baaba'aan. Xalaado dhif ah, isbeddelada unugyada wexey keeni karaan kansar. Caadi ahaan waxay qaadataa sanado badan ka hor caabuqa/infekshanka HPV inta aanu keenin kansarka.

---

# Waa maxay HPV iyo tallaalka HPV?

HPV waa fayras isugu gudba galmada ama taabasahdakale oo kalgacalka ah. Noocyada qaarkood ee HPV waxay keeni karaan isbeddelada unugyada gudaha dhuunta ilmagaleenka, kaas oo, xaalado dhif ah, ku samayn kara kansar. Waxaad noqon kartaa astaamo la'aan haddii aad qabto caabuqa/infekshanka HPV, ama unugyada aan caadiga ahayn.

**Caabuqyada/infekshanaada HPV waxaa looga hortaggi karaa tallaal.**
Wadankan Denmarka, tallaalka HPV hadda waxaa la siiyaa dhammaan carruurta jirta 12 sanadood iyo wixii ka wayn. Tallalka HPV kadib, waxaa kaa yaraaneysa khatarta uu kugu dhici karo cabuuga/infekshanka HPV, kasoo sababikaro kansarka dhuunta ilmagaleenka haweenka. Haweenka la tallaalay sidoo kale waxaa loogu deeqaa baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka. Sababta arrintani wexey tahay, in tallalka uu san caabin karin dhamman noocyada HPVga, sidaa darted tallalku ma sameyn karo ka hortag buuxa.

---

# Baadhitaanka muunada/cadka

**Waxaa jira labba qaab**
Waxaad heli doontaa miduun baadhitaanka ku salaysan unuga ama midka ku salaysan HPV ee kansarka dhuunta ilmagaleenka.

Labbada qaabba, baarisunugyo ayaa laga qaadidoona dhuuntaada ilmagaleenka. Baarista waxaa loo qaadaa qaab isku mid ah, iyo waxaa keliya kala duwan tafaftirka. Waxaa sidoo kale jiri kara xiili kala duwan, inta mar labaad aadan u baahan baaritaan kale. Labbada qaabba waa wax si wanaagsan loo hubiyay, waana qaabab fiican oo loogu hortagikaroo kansarka dhuunta ilmagaleenka.

Waxaa lagugu marti qaadi doonaa baadhitaanka wakhti ay ukala dhaxayso saddex ilaa shan sanadood, oo ku xidhan da'daada iyo qaabka baadhitaanka la isticmaalay.

Waxaad wax badan ka akhriyi kartaa oo ku saabsan sabata dhammaan haweenka aan loo siin qaab isku mid ah websaydka Masuuliyiinta Caafimaadka Dheeniska:
**www.sst.dk/screening**

# Xaqiiqooyinka ku saabsan baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka

340

Qiyaastii ***340*** oo Haweenka Dheeniska ah ayaa sanad kasta qaada kansarka dhuunta ilmagaleenka.
Qiyaastii ***90*** Haween Dheenis ah ayaa sanad kasta u dhinta kansarka dhuunta ilmagaleenka.

Kansarka dhuunta ilmagaleenka wuxuu ku dhic karaa da' kasto, laakiin si dhif ah waxya u saamaysaa haweenka ka yar 25.

Ka hor inta aan baadhitaanka la bilaabin, qiiyastii ***35*** ka mid ah ***1.000*** haween ayuu ku dhici jiirey kansarka dhuunta ilmagaleenka muddada cimrigooda.




Ka dib markii la bilaabey baadhitaanka, qiyaastii ***9*** ka mid ah ***1.000*** haweena oo uu ku dhacaa kansarka dhuunta ilmagaleenka muddada cimrigooda.




*Suuragal ma'aha in dhab ahaan loo sheego inta ay yihiin xaaladaha baaritaan oo laga hortagay. Si kastaba ha ahaatee, waxaa lagu qiyaasaa ilaa in ka badan kala badh.*

Ka hor baadhitaanka intaan al bilaabin, qiyaastii ***15*** ka mid ah ***100.000*** haween ayaa u dhintay kansarka dhuunta ilmagaleenka.




Ka dib markii baadhitaanka la bilaabay, tani waxay hoos u dhacdey qiyaastii. ***3*** ka mid ah ***100.000*** ka.




*Si kastaba ha ahaatee, waxaa jiri kara sababo kale oo looga qayb qaato hoos-u-dhaca. Tusaale ahaan, guud ahaan xaaladaha kansarka hore loo ogaaday iyo hadda daawaynta maanta ayay aad waxtar u tahay.*

Isha laga soo xigtay: Hadalqoral ku saabsan baaritaanka dhuunta ilmagaleenka

6-8

Kala duwanaanshaha u dhxeeya unugyada aan caadiga ahayn ee noqda kansarka iyo kuwan aan noqon si hubaal ah looma sheegi karo.

Wakhti kasta haweenayda iska ilaalisaa inay qaaddo kansarka, ***6-8*** haween ah ayaa laga jari doona qaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka unugyada aan caadiga ahayn ee aan kansar noqonlahayn.

# Khasaarada iyo faa'iidada baadhitaanka

## Waa maaxay faa'iidada baadhitaanku

**Xaaladaha kansarka dhuunta ilmagaleenka oo yaarada iyo dhimashada oo yarata**
Soo xaadirka baadhitaanka kansarka dhuunta ilmagaleenka, waxaad ku yarayn kartaa inaad si daran u jiranaato oo aad u dhimato kansarka dhuunta ilmagaleenka. Haddii unugyada aan caadiga hayn la ogaado marxalada hore, xaalado badan oo kansarka dhuunta ilmagaleenka ah waa la iska ilaalin karaa. Xaalado dhif ah, ayaa baaritanka lagu ogaadaa kansarka. Si dhaqsa ah oo loo oogaado kansarka, waxaa yaraaneysa khatarta ah in uu kansarka faafo.

**Daawaynta baahsanaanta yar**
Daawaynta isbeedelada unugyada wuu ka baahsanaan yar yahay daawaynta kansarka dhuunta ilmagaleenka. Unugyada aan caadiga ahayn ee aad u darankuna jira gudaha dhuunta ilmagaleenka waxaa lagu dawayn karaa qalliinka yar iyaddoo cusbitaalka lays dhigin. Daawaynta kansarka dhuunta ilmagaleenka aad ayay u baxaad wayn yahay, tusaale ahaan qaliinka wayn, daawaynta shucaaca ama daawaynta kiimikada ee kansarka.

## Waa maaxay khasaaraha baadhitaanku

**Raaxa darada**
Haweenka qaarkooda waxay la kulmaan raaxo daro la xidhiidha baadhitaanka cudurada haweenka. Waxay noqon kartaa fikrad wanaagsan inaad u sheegtid dhakhtarkaaga haddii aad dareento raaxa daro ku saabsan baadhitaanka.

**Werwerka iyo digniinta beenta ah**
Haddii baadhitaankaagu keeno shaki unugyada aan caadiga ahayn, waxaa lagu sin doonaa baadhitaan la socod ah oo uu bixiyo dhakhgtarkaaga ama baadhitaanada dheeraadka ah ee dhakhtarka cudurada haweenka. Baadhitaanka dheeraadka ah waxa uu noqon karaa caadi, arrintan waxaa loogu yeedha sax beenbeen ah / digniin been ah. Muddada aad sugayso natiijooyinka baadhitaanka ama baadhitaan dheeraad ah ayaa sababi kara werwer.

**Is daajin been ah**
Xataa haddii baadhitaankaagu muujiyo inaanay jirin calaamadaha unugyada aan caadiga ahayn, waxaa laga yaaba inaad qabtid ama ay kugu so bilaabanayaan unugyada aan caadiga ahayn. Khatarta aan la arkaynin unugyada aan caadiga ahayn, wey yaraanaysa haddii aad baarintaanka si xirrir ah uga qeybgashid. Unugyada aan caadiga ahayn ee aan hore loo helin, inta badan waxaa lagu ogaan doonaa baadhitaanka la socodka ah.

**Daawaynta aan lama huraanka ahayn**
Baadhitaanku waxa uu heli karaa unugyada aan caadiga ahayn ee xaaladaha qaarkood aan u dillacinkansarka. Wakhti kasta haweenayda iska ilaalisaa inay qaado kansarka, 6-8 haween ah ayaa laga jari doonaa qaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka unugyada aan caadiga ahayn ee aan kansar noqonlahayn. Jaridda ee qaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka waxya kordhisaa khatarta dhiciska. Ka qayb galka baadhitaanka, waxaad halis u tahay, inaad heshid daawayn aan loo baahnayn oo wax yeelo leh.

# Baadhitaan dheeraad ah

Haddii baaritaankaagu muujio caabuqa/infekshanka HPV ama unugyo aan caadiga ahayn, waxaad lagugula talin doonaa inaad qaado baaritaan kale lix bilood ama labba iyo toban bilood ka dib. Tani waxay ku xidhan tahay nooca HPV iyo da'daada.


Haddii baaritaankaga muujiyo unugyada sida daran aan caadiga u ahayn, waxaa ku baadhi doonaa dhakhtarka haweenka gudaha rugta cafimaadka ama cusbitaalka. Ayaddoo ay ku xirantahay da'daada, sidoo kale waxaa lagugu deeqi doona baaritan dheeraad ah, oo uu sameyn doono dhakhtarkaaga cudurada haweenka haddii baaritankaagu muujiyo nocyada gaarka ah ee HPV, ama haddii baaritankaagu muujiyo HPV iyo unugyada aan caadiga ahayn oo isku dhaf ah.

Dhakhtarka cudurada haweenku wuxuu si dhab ah u baadhi doonaa dhuunta ilmagaleenka wuxuuna qaadi doonaa cad baaris ah. Unugyada aan caadiga ahayn ee daran lama mid aha kansarka. Qofna ma garan karo wakhti hore, unugayda aan caadiga ahayn oo marka dhambe noqonkaaro kansar. Haddii dhakhtarka cudurada haweenka uu ogaado unugyada aan caadiga ahayn oo daraan, waxaa lagu tallindoona jarida qaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka (sidoo kale loo yaqaano jarida kuuska)

Xaalado dhif ah, baarista unuga waxaa ka iman kara shakiga kansarka dhuunta ilmagaleenka. Haddii ay kansar tahay, waxaa lagu siin doonaa daawaynta ku salasyan sida cudurka u faafayo.

### Jarida qaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka

Jarida qaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka, waxaa la jaraa cad u qaab eg dublo oo ku hareeraysan dhuunta ilmagaleenka, eeg jaantuuska. Saamaynta guudahaanugu badan ka dib jarida qaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka waa dhiig bax iyo caabuq/infekshan. Saamayn dhifta ah waa dhiig bax daran iyo dhuubashada dhuunta ilmagaleenka. Weli uur waad qaadikartaa oo waxaad dhali kartaa carruur ka dib jarida, si kastaba ha ahaatee, waxaa jira korodh yar oo halista diciiska ah.




Ka dib jaridaqaybta hoose ee dhuunta ilmagaleenka, dib ayaa lagaaga baadhi doonaa HPV iyo isbeddelaadda unuga. Haddii labbada baaris ay caadi yihiin, caadi ahaan looma baahna baadhitaanada la socodka ee dheeraadka ah. Waxaad markaas ula socon kartaa barnaamijka baadhitaanka si caadi ah. Dhammaan xaaladaha kale, waxaa lagu siin doonaa baadhitaanada la socodka ah.

**Astaamaha suuragalka ah ee kansarka dhuunta ilmagaleenka**

Waxaa jira astaamo dhif ah ee marxaladaha hore ee kansarka dhuunta ilmagaleenka. Haddii cudurku aad u horeeyay, astaamahu way muuqan karaan. Astaamaha soo socda waxay noqon karaan calaamada kansarka ilmagaleenka, laakiin sidoo kale waxay sababaan xaalado aan khatar ahayn:

- Dhiig baxa ka yimid siilka muddada ama ka dib galmada
- Dhiiga caadada aan caadiga ahayn iyo dhiig baxa ka dhambe joogsiga dhiiga caadada
- Isbeddel dheecaanka ka so baxa siilka, kaas oo leh ur iyo dhig
- Xanuunka qaska, kaas oo ku baaha dhabarka ama ilaa hoos lugaha
- Miisaanka oo dhaca, daal iyo cunida oo yaraato.

# Halkeen ka heli kartaacaawinaad?

**Gobolkaaga**

**Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan baadhitaanka**, fadlan la xidhiidh gobolka aad ku nooshahay. Waxaad ka arki kartaa cida lala xidhiidhayo warqadda marti qaadkaaga.

**Dhakhtarkaaga**

**Haddii aad qabto astaamaha ka yimid qaskaaga**, sida dhiig baxa aan la filayn ama xanuun, waa inaad had iyo jeer la tashataa dhakhtarkaaga si, si dhab ah laguu baadho. Arrintani sidoo kale way habboon tahay haddii aad ka qayb gasho barnaamijka baadhitaanka.

**sst.dk**

**Waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo ku saabsan** kansarka dhuunta ilmagaleenka, barnaamijka baadhida iyo tirooyinka lagu soo bandhigay warqaddan warsidaha ee Masuuliyiinta Caafimaadka Dheeniska websaydka: **www.sst.dk/screening**.

Health for all